


FAAF REEB

Mustafe Ibrahim



HALGANKA SHACABKA SOOMALIDA OGAADEENIYA.

1: Hordhac:

2: Xaalada Soomaalida Ogaadeeniya:

3: Ismaamulka Somalida ama Kililka 5aad Maxuu yahay?:

4: Hagardaamo Gumeysi iyo Gobollada Soomaaliya:

5: Xasuuqa iyo Tacadiga Balaadhan ee Dowladda Ithiopia ugeysato Soomaalida Ogaadeeniya:

6: Halgamadii ladagaalamay Guumeysiga Abbysinia:

7: Gabagabo:

1: HORDHAC:

Dareenka & fikirka manta badeeco ahaan la iibgaynayo ayaa ah moora-duugga taariikhda iyo sooyaalka taxane ee ku salaysnaa loollanka waligii dhex yiilay gobonimadoonka soomaalida Ogaadeeniya iyo dhul-ballaadhsiga gumaystayaashii isaga danbeeyey maamulka hagar daamo ,dibindabayo iyo gardaraysi ee ay hormuudka ka ahaayeen xulufada ku bahawday magaca Abbasiniya, sidaas darteed ayaan qalinka u qaatay Qoraalkan oo ku foorara warbxin aan ku eegayo iska caabintii Dhulbalaadhsiga Gumeysiga Abbysina iyo sida Shacabka Soomaalida Ogaadeeniya uga dhiidhiyeen ugana horyimadeen. Waxaan soo bandhigayaa warbixino iyo dhacdooyin xanuun badan oon ku qaada dhigayo xaalada guud ee Dhulka soomaalida Ogaadeeniya. Waa qoraal dheer oo aan ku eegayo Taariikh ahaan Maamuladii Gumeysiga Ethiopia ee soo maray Dhulka Soomaalida Ogaadeeniya iyo qaabka ay u cadaadin jireen. Waxaan si kooban oga warbixinayaa Maamulada soo maray Dhulkaas iyo ujeedada shaqo ee laga leeyahay!!!!.

Halbeegga aan higsanayo dartii, Waxaan si gooni ah faaf-reeb ugu samayn doonaa Nidaamka Foosha xun ee guumeysi, Xasuuqa loo geystay Shacabka Soomaalida Ogaadeeniya ee isugu jira Dilka, Dhaca, Kufsigu, Mudadii uu Taliska Guumeysiga Ethiopia hayay Melez Zenawi. Qoraalkan waxaan ku sharxidoonaa Maamulada Gobalada Soomaaliya dhibaata ay ku hayaan Shacabka Soomaalida Ogaadeeniya ee u soo qaxa Goboladaas iyo iska horkeenka Dowlada Ethiopia ay isaga hor keenayso Shacabka Soomaaliyeed meelkasta oo ay ku noolyihiinba.

Gunaanad waxaa noqon doona heerka uu marayo halganka shacabka Soomaalida Ogaadeeniya iyo sida loo hormarinkaro.

2: Xaalada Soomaalida Ogaadeeniya!

Muran kama taagna in Dhulka Soomaalida Ogadenia uu abid ku sifaysnaa dhul iyo dad xor ah oo kamid ah dhulka baaxadda weyn ee Geeska Afrika ee Soomalidu ku dhaqantahay. Waa dhul taariikh dheer Hiddo iyo dhaqanba saameyn weyn ku leh sooyaalka Geeska Afrika gaar ahaan Ummadda Soomaaliyeed.

Kalfadhi-khiyaanoodkii Guumeystaha Ree Galbeedku isugu yimaadeen waddanka Germany 1884 – 1885 si ay u qaybsadaan dhulka Afrika ayaa waxa shirkaas isugu yimid dhamaanba wadamada haystay dhulka Afrika ee awoodana lahaa waqtigaas sida Britain, Germany, France, Portugal, Netherlands, Belgium kuwaas oo dhamaantood guumeysanayay dad iyo dhul afrikan ah. Shirkan waxaa kale oo lagu casuumay wadanka USA oo isagu wadanka Liberia xiisaynayay balse diiday innuu ka qayb nodo iyo Boqortooyada Abbysinia oo Dhulka soomaliyeed rabtay. Shirkaas sida wadamada Afrika Guumeystayaashu ugu qaybsadeen waxa sidoo kale dhulka Ummada Soomaliyeed loogu qeybiyay 5 Qeybood oo qeyb ka mid ahi tahay Dhulka Soomalida Ogaadeeniya. Waxa Ogadeniya Qabsaday Guumeystayaasha Talyaani (Italy) iyo Ingiriis (Britain). Kadibna Ingiriiska

ayaa Waxa uu ku wareejiyay Abbyssinia. Guumeystaha Abbyssinia waa Guumeystaha kaliya ee Madow ah ee Ka mid noqday Qaybsashada Dhul iyo Dad Afrikaan ah Shirkaa Baarliin 1884.

Nuxurka ay aqoonyahanka soomaaliyeed ka gabi-dhacleeyaan ayaa ah is waydiinta ah “ Soomalida Ogaadeniya marna ma Ogolaadeen Guumeystihii Caddaa iyo Kan madow midna? Jawaabta qayaxan ayaa ah MAYA! Bal ‘e Waxa ay hormuud u noqdeen xoriyad-doonkii Soomaliyeed ee lagu kicinayay Guumeystaha Ingiriiska, Talyaaniga, iyo Xabashida. Waana taariikh ay wali carabka duqaydii joogtay ka qoyan yahay.

Haddii aynu qaaciddada guud ka dhiraandhirino waqtigii Guumeystaha Madow qabsaday dhulka Soomalida Ogadeniya kuna giijino waaqica manta, Waxa socdo dagaalo Xornimo doon oo lagu diidanyahay Guumysiga Abbyssinia ee Kusoo duulay Soomalida dariska la ah. Waxaa kamid ah Dagaalki Daraawiishta, OLF-Nasrullaah, WSLF, Iyo ONLF oo hada waqtigan ka dagaalanta Ogadeniya. Sidoo kale waxa Dhulkan isku hardiyay Labada Dowladood ee Soomaliya iyo Ethiopia dagaalki Ogaden ee 1977.

Shacabka Soomalida Ogaadeniyana Waligood meysan helin Xuquqdooda aayo ka talin, lamana weydiinin rabitaankooda.

Ha kala reebin nidaamkii gumaysi ee kala gaddisnaa ee Ethiopia soomaray lagasoo bilaabo Minilik, Haileselassie, Mengistu iyo Maamulka hada jira TPLF ee Zenawi hooseeye-wadaagahoodu (common denominator) wuxuu salka ku hayey Cadaadinta shacabka Soomalida Ogadeniya.

Ethiopia waxa ka jooga dhulka Soomalida Ogaadeeniya Ciidan kaliya, ciidankaas oo ah 1/3 saddex qeybood oo meel tirrada guud ee ciidanka Ethiopia. Ciidankaas oo shaqadoodu tahay kaliya sidii ay u cadaadin lahaayen soomalida Ogadeniya ee gacantooda ku jira una burburin lahaayeen dhamaanba waxyaalaha aasaaska u ah nolosha bani aadamka, Baad iyo xoolaha nool intaba.

Haddii aynu ka wada simannahay qeexidda aasaasiga ah ee kalmadda Horumar, waxaynu odhan karnaa Dhulkan kama jiraan wax horumar ah waxa kaliya ee lagu tilmaamo horumar waa wax loo sameeyay istiraatajiyada ciidanka Ethiopia. Hadey ahaan lahayd Waxbarasho, Caafimaad. Waxa ka jira 3 wado oo loo sameeyay isku xirka ciidanka Ethiopia kuwaas oo mara kaliya Goobaha ciidanka Ethiopia Fadhiisimaha waaweyn ay ku leeyihiin. Goobaha Magaalooyinka ku yaalaan ama loo dhisay waa qaab dhufeys oo ah khidad dhufeys ciidanka Itoobiya ku maamulaan dhulka Soomalida Ogadeniya. Tusaale ahaan dhamaan Dhismaha Iskuulada iyo Goobaha Caafimaadka Waxa ay ku weegaarsan yihiin Xeryaha Ciidanka Itoobiya.

Dabar-goynta bulshadan ay kala kulantay nidaamka gumaysi waxaa astaan cad oon caadna saarnayn u ah in Deegaanka laga gooyay dhamaanba Xidhiidhka Caalamiga ah loomana ogola Hay’ado Madax banaan oo ka howlgala. Sidoo kale looma ogola Saxaafada Caalamka inay tagto kana soo waranto.

Waxaa xusid mudan inuusan Shacabka Soomalida Ogadeniya la wadaagin Dhaqan iyo Dhaqaale toona Itoobiya kale. Dhamaan Ganacsiga dhulka waxa uu ku xiranyahay Soomaliya. Nolosha Soomalida Ogadeniya oo ku xiran Xoolaha Nool, islamarkaasna lo’da, Geela, iyo adhiga ugu badan Geeska Afrika uu ku dhaqanyahay dhulkaas. Waxa ay u qaadaan Xoolaha Nool Xeebaha Dhulka Soomaliya Halkaas oo laga dhoofiyo waxa ayna ku soo badashaan Raashin sida Bariis, Sonkor iyo alaabokale. Dhulka soomalida Ogadeniya lagama isticmaalo Lacagta qofkii lagu arkana waxa

kalawareega Ciidanka Itoobiya. Sanadkii 2006 Waxii ka horreeyay waxa ka shaqeynaysay lacagta Shiling Soomaaliga. Hada waxa lagu qasbay inay qaataan lacagta Itoobiya ee Birr-ta oo laga aqoon dhulkaas isticmaalkeeda.

Sumadda asal-ma doorshe ee Ethiopia waxaa astaan u ah sifada ah in Markasta oo Jabhad gobonimo-doon ahi ka hana qaaddo gayigaa kuna xoogaysato Dhulka Soomaalida Ogaadeniya, ama la helo Dad qadiyada Ummada Ogaadeeniya u hadla- Waxay Dowlada Itoobiya ay qaadataa talaabbo cadaadis ay kula kacdo Shacabka soomalida Ogaadeeniya. Tusaale ahaan kacdoonkii Jabhadihii Ogaden Liberation front (Nasrullaah) iyo WSLF (Jabhada Soomali Galbeed) dowlada Ethiopia waxa ay Xasuq ba'an u geysatay shacabka soomaalida Ogadeniya. Waxa ay xidhay dhamaanba Xuuddudaha Ogadeniya la leedahay Soomaliya, Iyaga oo xerro u ooday Geel-layda Soomalida Ogadeniya. Gaadiidkana waxay kusoo rogtay "ilif" oo ah aqoonsi qofkii aan wadan uusan u baxi Karin una gudbi Karin magaalo kale oo kamid ah Soomaalida Ogaadeeniya.

Wuxuu caalamku guud ahaan, Bulshada Soomaalida Ogaadeeniya gaar ahaan ay marag ka ahayd in Taliska Dhergiga ee Mangistu Xeeyle Maariyaam Markuu dhacay waxa Ummada Soomalida Ogaadeniya loo ogolaaday markii u horeysay inay si xorra isu dooraataan una dhistaan maamul matala markii u horreysay taariikhdooda. Waxa si xorra uga qeyb galay doorashadaas 14 Urur oo soomalida Ogadeniya ah. Waxana doorashadaas 80% ku soo baxay Ururuka ONLF ee Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogadeniya iyaga oo dhisay Dowladii matali laheyd aayaha Shacabka Soomaalida Ogaadeeniya. Inkasta oo ismaamul inay dhistaan loo oggolaay lakiin hadana waxa wadanka Gacanta ku hayay Ciidanka Taliska Cusub ee TPLF, oo ah Jabhadda Tigreega oo iyagu xoog kaga qabsaday Taliskii Dhergiga ee Mangistu Xeeyle-Maariyam sanadkii 1991dii.

Bishii February 1994-tii Baarlamaanka maamulka Cusub ee Ismaamulka Soomalida Ogaadeeniya waxa ay u coddeeyeen in afti laga qaado Soomaalida Ogaadeeniya waxayna codsigii u gudbiyeen Dowlada Dhexe ee Itoobiya. Sidoo kale Waxgaradka iyo Odayaasha Soomalida Ogadeniya iyo Ururka ONLF waxa ay Go'aamiyeen rabitaanka ummada soomalida Ogadeniya ee ah aayahooda in shacabka soomalida Ogadeniya ay iyagu ka tashadaan.

Sidii aynu kor ku soo tibaaxnay, ahaydna sifada asal ma-doorshe ee fac ka fac lagu yiqiinay gumaysiga dowlada Itoobiya ee EPRDF /TPLF waxa ay qaateen talaabo aad u xoog badan oo ay kaga hortagayaan rabitaanka Shacabka Soomalida Ogadeniya. Waxa ay markiiba xoog uga qaadeen Maamulkii Somalida Ogadeniya iyaga oo xidhay Madaxweyne Cabdullaahi Maxamed Sacdi, Madaxweyne Ku Xigeen Mudane Siyaad Badri iyo Afahayeenka Baarlamaanka Mudane Badri. Sidoo kale waxa ay weeraro isdaba joogga ku qaadeen Xarumaha Uruka ONLF. Islamarkaasna waxay Ismaamulka Soomalida Ogaadeeniya u abuureen Xubno Maamul cusub oo taabacsan rabitaanka dowlada Dhexe ee EPRDF/TPLF. Waxa-kale oo labbadalay Caasimmadii Soomalida Ogaadeeniya Godey oo lageeyay Magaalada Jigjiga, maadama Jigjiga ay u dhowdahay Addis Ababa si dhibyarna looga maamulikaro Maamulka cusub ee tallada loo dhiibtay.

Taariikhdu kolkay ahayd 22 February 1994 Ciidanka TPLF waxa ay weerar ku qaadeen shacabka Magaalada Wardheer oo uu ku sugnaa Gudoomiyaha Ururka ONLF Sheekh Ibraahin Cabdallaah, halkaas oo ay ku dileen 81 qof kuna dhaawaceen 17 qof. Balse waa ku guul dareysteen inay qabtaan ama wax gaadhsiiyaan Madaxweynaha Ururka ONLF oo shacabku si geesinimo leh u difaaceen. Sidoo kale waxa ay dileen Masuuliyiin aad u faro badan oo ahaa madaxda sare ee Maamulka Degmooyinka Qabridahare, Qalaafe, Godey, Wardheer, dhagaxbuur, Fiiq, Qabribayax, Qoriile.

Iyaga oo xidhay illaa hadana la ogeyn meel ay ku suganyihiin shacab aad u badan oo isugu jiraa Ganacsato, Culumo, Qoraa, waayeel, caruur iyo haween. Hoos ka daawo Shaxda Shacabka 1994 la dilay ama la xidhay.ⁱ

Maamulk TPLF waxa uu ka hor yimid dhamaanba sharciyadii ay qoreen. Wuxuu hoggaanka EPRDF si aan gabasho lahayn uga horyimaadeen dhamaanba sharciyada Caalamiga ah ee xuquuqul Insaanka. Waxa ay u diideen Hay'adaha Qaramada Midoobay, Hay'adaha Caalamiga ah iyo Suxufiyiinta inay galaan dhulkaas oo ay kasoo waramaan. Balse Waxa hay'ada Human Right Watch oo adeegsanaysa Shirkada satteliteka AAA's ay ku guuleysteen inay Cirka ka sawiraan 80 Magaalo oo Ciidanka Dowlada Itoobiya Gubeenⁱⁱ. Waxa kale oo si qarsoodi ah ku galay suxufiyiin ay kamid yihiin New York Times, Al Jazeera iyo suxufiyo sawirada Qaada. Dhamaan dadkaas waxa ay aqoonsadeen in xaalada shacabka Soomalida Ogadeniya ay tahay mid aad khatar u ah waxayna markii u horeysay banaanka u soo saareen waxii ay dowlada Itoobiya ka qarinsay Caalamka.

Haayadaha Samafalka iyo Xuquuqul Insaanka Hay'adaha u dooda waxa ay Dowlada Itoobiya ku eedeeyeen cunaqabataynta ay saareen shacabka soomalida Ogadeniya, iyaga oo xidhay dhamaanba isku socodka magaalooyinka soomalida Ogadeniya. Sidoo kale waxa ay xidheen xuduudka Soomaaliya oo ah meesha kaliya ee Ganacsi la lahaayeen shacabka Soomaalida Ogaadeniya. Hay'aduhu waxa kale oo ay ku eedeeyeen in Raashiinka Caawimaadka loo bixiyo in Ciidanka Itoobiya ay leexsadaan oo aysan gaarin shacabkii loogu talo galay.

Waxaa maktabadaha caalamka wada yaala diiwaano (documents) ay ku sharaxan yihiin dowlada Itoobiya cadaadiska uga yimid Wadamada European-ka iyo Mareykanka oo iyana kusoo saaray warbixintooda Xuquuqul insaanka waxayna Itoobiya ka codsadeen in Baaritaan lagu sameeyo dhibaatada Xuquuqul insaan ee ka taagan Ogadeniya, arintaas oo ay ka hortimid dowlada Itoobiya oo illaa hada si cad u ogolaanin.

Sanadkii 2007 Waxa sidoo kale markii ugu horeysay booqday wafdi sare oo uu hoggaaminayo Sir John Holmes oo ah madaxa Macaawamada Qaramada Midoobay si uu uga hortago dhibaatada Abaaraha iyo macaluush ee ku habsatay Ogadeniya. Waxa uu sheegay John Holmes in ay jirto cabsi badan oo ku aadan in cunno yari ka dhacdo Ogaadeniya waxa kale oo uu yiri waxa aan la hadlay Madax-sare oo Itoobiyaan ah iyo Meles Zenawi waxana kala hadlay arrimaha ka dhanka ah Xuquuqul insaanka ee ay geysteen ciidamada Itoobiya waxaana ugu baaqay in arintaas lagu sameeyo baadhitaano madax banaan.ⁱⁱⁱ

2008 waxaa booqasho ku aaday Magaalada Qabridahare Wasiirkii hore ee Horumarinta iyo macaawamada Wadanka UK Douglas Alexander . Wasiirka wuxuu booqday Xarun Caafimaad oo ay dowladiisu bixisay dhaqalaaha lagu sameeyay. Waxaa intii uusan gaadhin Xarunta Caafimaadka laga saaraay dhamaanba bugtadii ku jirtay Xarunta oo laqariyay si uusan u arkin dhibaatada macluul ee heysata caruurta. Warar si qarsoon u soo baxay oo lagu daabacay Wargeysyada Wadanka UK ayaa sheegay in wasiirku Meles Zenawi u sheegay in dowladiisu ay ka gooynto dhamaanba Mucaawamada ay siiso Itoobiya.

Waxa lagu dhageystay xaalada xuquuqul insaan ee dhulka somalida Ogadeniya Guriga Baarlamaanka Europe, Qaramada Midoobay ee Geneva iyo Wasaarada arrimaha dibada ee wadanka USA oo dhamaantood ku eedeeyay dowlada Ethiopia tacadiyada ay ku hayso shacabka somalida Ogadeniya.

Haddaba halkan ka daawo Filim ay kasoo diyaariyeen Wakalada TV-ga Channel4 News ee wadanka UK iyaga o tusinaya dhibaataada, musq maasuqa, Gaajada iyo xassuqa ay dowlada Ethiopia ka geysato dhulka somalida Ogadeniya iyo aragtida ku aadan caalamka.

<http://link.brightcove.com/services/player/bcpid1184614595?bctid=1801928398>

3: Ismaamulka Soomaalida ama Kililka 5aad Maxuu yahay?

Magaca Ismaamulka deegaanka Qowmiyada Soomalida ama kililka 5aad waa magac maamul oo gacan ku sameys ah oo uu sameystay taliska TPLF ee Males Zenawi kuwaas oo aan matalain Qadiyada Shacabka Soomalida Ogadeniya. Ma aha Maamul si rasmi ah loosoo doorto, waxa soo magacaaba Maamulka TPLF, shakhsigaas ay iyagu magacabaan ayaa ah shakhsiga kaliya ee awood leh ee wax kafulinkara Dhulkaas. Shakhsigii Masuul ka noqda waxa ay shaqadiisu socotaa muddo 7 bilood illaa 2 sano iyo badh ugu badnaan waxaana uu ku danbeeya in la xidho, fakado, ama latokooro.

Maamulka Soomaalida Ogaadeniya waxaa si rasmi ah loo soo doortay mudadii uu ururka ONLF hogaaminayay talada ismaamulkaas intii aysan Duurka si rasmi ah u wada galin oo qoriga qaadanin Jabhadu sanadkii 1994.

Waxa talada Maamulkan soo qabtay 11 Madaxweyne muddo 16 sanno ah ee uu ismaamulkan ka jiray dhulka Somalida Ogadeniya. Madaxweynaha ugu badan waxa uu hayay tallada 2 sano iyo 10 bilood halka kan ugu yar uu hayay 7 bilood, 11 bilood, iyo 8 bilood.

Madaxda soomartay ayaa intooda badan xabsi ku danbeeyay waxana dowlada Itoobiya ay ku eedaysaa inaysan fulin ummuurihii loo xilsaaray. Iyaga oo si aad u fool xun u ceebeeya oo ku eedeeya inay lacago lunsadeen kartina aysan laheyn.

INTAJEER EE LA FARAGALIYAY MAAMULKA GOBOLKA: 11 MADAXWAYNE OO LAYSKU BADDALAY MUDDO 16 SANO AH:

1. Jan 1993 – Nov. 1993 Sacdi
2. Nov 1993 – April 1994 Xasan Jire
3. Apr 1994 – Feb 1995 Ugas C/ raxman
4. Feb 1995 – Oct 1995 Axmed Makahil
5. Oct 1995 – Oct 1997 lid Dahir
6. Oct 1997 – Oct 2000 M. M. Cali
7. Oct 2000 – Jan 2003 C/ rashid Dulane
8. Jan 2003 – Dec 2005 Cabdul Jibril
9. Dec 2005 – Oct 2008 Cabdulahi Xasan
10. Oct 2008 – July 2010 Daud Maxamed Cali
11. July 2010 - present Cabdi Maxamed Cumar (ina Ilay)

1. Madaxweynihii Ugu horeeyay ee dhulka iyo shacabka Somalida Ogaadeniya Mudane C/llaahi Maxamed Sacdi iyo ku xigeenkisii iyo afhayeenkii Baarlamaanka Ogaadeeniya ayaa waxa loo taxaabay Xabsiga Bishii December 1993. Madaxweynuhu waxa uu xabsiga ku jiray muddo sanad ah, ka dibna waxa la sii daayay isaga oo aan la saarin wax maxkamad ah isla markaasna lagu helin wax danbi ah. Madaxweyne Sacdi waxa uu talada hayay muddo 11 bilood oo kaliya ah. Mudadii uu xabsiga ka soo baxay ka dib waxa uu ku noola Europe isaga oo ku geeriyoday Magaalada London. Allaah marxuumka Janadii fardowsa haka waraabiyo.
2. Waxa lagu badalay Madaxweyne Xasan Jire Qalinle oo isaguna hayay talada Madaxtinimo muddo 7 bilood ah kaliya. Madaxweyne Qalinle sidoo kale waxa loo taxaabay Xabsiga oo uu muddo ku jiray laguna helin wax danbi ah oo uu galay kadibna waa lasii daayay. Madaxweynaha waxa loo xidhay maadama Baarlamaankiisu ay ansixiyeen oo ay codsi u direen Dowlada Dhexe ee Itoobiya in afti laga qaado shacabka Soomalida Ogaadeniya.

Waxii ka danbeeyay labadaas madaxweyne ee hore waxaa si toos ah usoo magacaabayay madaxda iyo shaqaalaha Kililka 5aad Maamulka TPLF/EPRDF. Dowlada Itoobiya waxa ay bilowday inay magacaabato Madaxweyne iyo lataliye. Madaxweynuhu waxa uu noqonaya nin Soomali ah oo taageersan TPLF/EPRDF lataliyuhuna waa nin Tigre ah. Madaxweynuhu waxa uu qabanaya kaliya waxa uu lataliyihiisa ogyahay. Arintan lataliyaha ayaa waxa dowlada Itoobiya ay uga hortagaysaa maamulka toosan iyo Fikirka saliiimka ah ee sida xorta ah Madaxda Maamulka Soomalida Ogadeniya qabanaysa shaqadooda ugu gudanayaan. Waxa uu ka hortagaya rabitaanka shacabka Soomalida Ogadeniya ee ah in afti laga qaado aayahoodana ay ka tashadaan.

- 3 Madaxweyne Xasan Jire Qalinle waxaa lagu badalay Ugaas Abdulrahmaan Muxumed Qani oo dowlada Itoobiya ku tirinaysay nin taabacsan fikirka EPRDF balse waxa uu talada hayay kaliya muddo dhan 8 bilood lagasoo bilaabo April 1994 ilaa November 1994. Madaxweyne Ugaas Abdulrahmaan waxaa afganbiyay Xubno ka tirsan maamulkiisa iyo Ciidamada Tigreega ee Talada haya. Ugaaska waxaa lagu xidhay Magaalada Godey Bishii July 2008 isaga iyo dad ku dhow 100 qof oo shacab ah. Ugaaska waxaa la xidhay kadib muddo 2 sano ah uu ugu jiray olole ay dowlada Itoobiya kusoo dirtay odayaal uu kamid ahaa ugaaska kuwaas oo Safaro ku tagay Europe iyo USA si ay ula hadlaan Shacabka Soomaalida Ogaadeeniya ee Qurba joogta iyo masuuliyiinta ONLF.
- 4 Axamed Makahil waxaa uu talada madaxtinimada qabtay February 1994 isaga oo xilka laga qaaday October 1995 xabsina uu mutaystay. Madaxweynaha waxaa lagu xidhay xabsi aad u liita waxa uuna ka codsaday madaxda kililka ee kadanbaysa inay hagaajiyaan xabsiyada maadama iyaguna ay soo gali doonaan. Isaga oo markaas Madaxweynihi ku xigay Ciid arintaas kula taliyay.
- 5 Ciidanka Dowlada Itoobiya markale waxay magacaabeen Madaxweyne Cusub Ciid Daahir oo noqday madaxweyne 1995. Ciid Daahir waxa uu kamid ahaa Xisbiga leegada ee “Ethiopian Somalid Democratic League (ESDL)”. ESDL waxa loo sameeyay in shacabka soomalida Ogadeniya qadiyadooda looga yeelo mid Itoobiyaan iyo sidii lagu tirtiri lahaa rabitaanka shacabka ee aayo ka talin. Waa ururkii u horeeyay ee la shuraakooba Xisbiga talada haya ee EPRDF. Waxa ururkan uu jiray 1994 illaa 1998 waxana sameeyay Xisbiga TPLF oo uu wakiil uga ahaa Cabdul Majiid Xuseen.

Ururkan cusub ee ESDL dowlada Itoobiya waa ku qanciweyday markaasna waxa ay bilowday inay malmaluuqdo nidaam kale oo ay ugu magac dartay waxa ay ugu yeereen ONLF Cusub. ONLF-ta cusub ayaa ah xubno shaqsiyaad oo katirsanaa Ururka ONLF oo dhibka iyo rafaadka xammili waayay islamarkaasna kusoo laabtay magaalooyinka. Xubnahaas ayaa dowlada Itoobiya waxa ay u sheegtay inay idaacada ka hadlaan kuna dhawaaqaan in Ururka ONLF soo xerooday kana qayb qaataan dhismaha dowlada ismaamulka Somalida. Sidaas awgeed xubnahaas oo ka hadlay BBC la'aanta afsomaliga ayaa sheegay in Ururka ONLF si buuxda u qaatay nabada oo ay isusoo dhiibeen Dowlada Ethiopia arrintaas oo aheyd mid aan waxba ka jirin balse dowlada Ethiopia ay ka laheyd sidii ay shacabka somalida Ogadeniya khalkhal ugu beeri laheyd islamarkaasna caalamka ay isaga dhisayso.

Ururka TPLF waxa uu soo wakiishay Dr Cabdulmajiid Xuseen iyo Mudane Dirir in ay isku daraan ururkaas ay dowlada Itoobiya ku tilmaamtay mid fashilmay (ESDL) kuna dhexqasto ONLF-ta Cusub. Waxana halkaas lagu sameeyay ururka SPDP ee Somali People Democratic Party. Ururkaas oo ah iskudhaf ONLF ta cusub iyo ESDL.

Madaxweyne Ciid Daahir sidii madaxweynihii ka horeeyay waxa laga xayubiyay talada madaxnimada isaga oo kamaqan Jigjiga. Waxana lagu eedayay inuu lunsaday hantibadan islamarkaasna uusan laheyn karti maamul. Ciid Daahir sidii madaxdii ka horeysay waxa loo taxaabay Xabsi, nasiib darro Ciid waxa uu awood u waayay inuu daryeelo xabsiyada lagu xidho madaxda maamulka kililka taas oo madaxweynihii ka horeeyay talo ahaan ugu gudbiyay inuu intaas qabto mudada uu talada hayo.

- 6 Waxa Talada Ismaamulka Kililka 5aad loo magacaabay Madaxweyne Maxamed Macalin Cali bishii October 1997 waxuuna talada hayay ilaa October 2000. Madaxweynaha cusub ayaa waxa uu sheegtay inuu yahay Xubin ururka ONLF ah. Waxa sida madaxdii ka horeysay lagu eedayay karti daro, hanti uu lunsaday iyo jabhadaha oo uu shuraako la leeyahay waxana loo taxaabay xadhig muddo dheer ah. Kadib waxa lasii daayay isaga oo aasan maxkamad lasaarin. Madaxweyne Maxamed Macalin waxa uu ku guuleystay inuu nal musqul u sameeyo xabsiyada aadka u qaabka daran ee Maamulka Kililka lageeyo. (kililka waa naaneys ama magac loo isticmaalo maamulka somalida ah ee hoostaga dowlada Ethiopia)
- 7 Maamulkka taliska haya ee EPRDF/TPLF waxa ay markale soo abaabuleen nidaamkii lagu magacaabi lahaa Madaxweyne Cusub oo fuliya danaha dowlada Ethiopia. Abdul rashiid Duulane oo ahaa Wasiir ku xigeen Federaalka ah ayaa waxay usoo wakiisheen inuu qabto talada Maamulka. Waxana laga dhigay Madaxweyne Bishii October 2000 isaga oo talada si hayay ilaa 2003.

Madaxweyne Cabdirashiid duulane oo aaminsanaa inuu wax kaqaban karo dhulka Somalida Ogadeniya, waxa uu markiiba codsaday in uu u madax banaanado talada Madaxtinimada. Waxa uuna codsaday in Lataliyaasha wasaarad kasta kajira ee TPLF inlaga kaxeeyo dowladiisa, Sidoo kale waxa uu codsaday lataliye madaxweynaha inuusan xafiiskiisu u baahneyn. Arintaas oo aheyd mid aan la failayn waxa marki u horeysay shaqadii laga qaaday lataliyaashi ka socday Dowlada dhexe. Mudane Cabdirashiid waxa kale oo uu sheegay Ciidamada Itoobiya iyo shaqaale ka tirsan maamulka somalida inay musuqmaasuq geysanayaan sidaas awgeed Ciidanka Itoobiya ee kusugan Ogadeniya aysan amarkiisa la'aantii waxba fulin Karin. Arintaas ayaa waxa ay keentay in Ciidanka Itoobiya ee kusugan Ogadeniya inay afganbiyaan madaxweynaha cusub ee kalsoonida ka wata maamulka TPLF.

Ciidanka Itoobiya waxa ay ku eedeeyeen Cabdulrashiid in maamulkiisu yahay madaxdii soomaliya, fikirkooduna uu yahay Soomaliweyn. Waxaa lagu eedeeyay mudadii uu talada hayay in Ciidanka ONLF iyo taageradoodu aad u sii batay. Sidaas awgeed inshaqada laga qaado. Waxa kale oo shaqadii laga qaaday dhamaan Shaqaalihii kililka ee haystay Shahaado Soomaliya ah. Cabdirashiid Duulane lama xidhin. Lakiin madax badan oo dowladiisa ka mid ahaa ayaa loo taxaabay Xabsi. Dowlada Ethiopia ayaa waxa ay markii ugu horeysay gaadhay go'aan ah in aan la xidhin Madaxweynayaasha kililka maadama ceebo badan ugaga yimadeen dowladaha deeqda siiya oo ka cawday deeqda la siiyo dhulka somalida Ogadeniya inaysan gaarin madaxda kililkuna awood laheyn iyaga oo tusaale usoo qaadanaya madaxda kililka ee xabsiyada loo taxaabo. Si kalsoonida wadamada deeqda bixiya loo soo celiyo dowlada Ethiopia waxa ay soo saartay qorshe cusub oo madaxda kililka si dadban gacanta loogu hayo.

8 Abdul Jibril (acting) (2003 - October 2005)

Madaxweyne Cabdirashiid Duulane waxa lagu baladay Abdul Jibriil si ku meel gaara waxana kasii danbeeyay Madaxdii ugu nidaam iyo dhaqan xumaa ee soo mara ismaamulka Somalida Itoobiya sameysay. Madaxdan danbe ee cusub waxa loo heystaa Danbiyo Dagaal iyo Xasuuq ay u geysteen bulshada rayidka ah ee soomalida Ogadeniya

9 Abdulahi Hassan Mohammed (October 2005 - October 2008)

10 Daud Mohamed Ali (October 2008 -2010)

11 Ina ilay madaxweynaha cusub...

Dowlada Itoobiya si ay uga baaran dagto Madaxda qabsaneysa Kililka waxa ay bilowday tababaro dag dag ah oo ay u furto shaqaalaha kililka, kuwaas oo labarayo midnimada Itoobiya iyo xeerka TPLF. Tababaradaas ayaa kamid ah qaabka la isu eedeeyo loona fashiliyo xubnaha maamulka ee shaqada haya. Maamulka Deegaanka Soomalida ayaa waxaa lagu mashquuliyay khilaafaad u dhexeeya dhexdooda si aysan waxqabad u sameyn. Shaqada kaliya ee ka fusha Maamulka ayaa waxa uu noqday xasuuq ay ka geystaan dhulka soomaalida Ogaadeniya iyo shirar socda Bilo oo lagu qiimeeyo Maamulka laguna baro ahdaafta taliska TPLF. Kumaa ONLF lagu tuhmikaraa iyo yaa xidhiidh adag laleh Generaalka TPLF ee Ciidamada ku sugan Ogaadeeniya ayaa ah hadalka ugu badan ee aad ka maqlayso maamulada kililka. Ninka Ciidanka TPLF xidhiidh la leh kaliya ayaa ah kaN ugu awood badan ismaamulkaas deegaanka Somalida ee Itoobiya maamusho.

Sidoo kale waxa lagu ababiyaa sidii ay ula shaqeyn lahaayeen Ciidnaka Itoobiya oo isagu ah mid geysta xasuuq ba'an oo maati, haween , ciroole iyo caruur toona u aabo yeelin.

Waxa dhacda in loo kala safto laba kooxood koox markaas haysa talada Maamulka iyo koox kasoo horjeeda. Kooxda talada haysa waxa laga soo horjeedsada marka lataliyaha madaxweynuhu ama generaalka ciidanka TPLF ee haysta Ogadeniya uu arko shaqadii loo diray inuu saluugay. Waxa uu amar siiya xubno ka tirsan maamulka oo uu dhagta ugu sheega inuu iyaga taageersanyahay islama ahaantaasna lagaaray waqtigii la qiimeyn lahaa madaxweynaha deegaanka. Qiimeyntaas ayaa waxa ay keenta in loo sameeyo shirqoolo lagu gaynayo God-dheer hoostii. Waxaa loogu yeeraa shirar ka dhaca Magaalada Addis Ababa. Shirkaas oo dhabarka looga soo taabto qofkii badali lahaa Madaxweynaha ismaamulka. Halkaas ayaana lagusoo go'aamiya in uu jeel gali doono Madaxweynahaas ama uu xabsi guri gali doono.

Tusaale ahaan Madaxweyne Cabdullaahi Xasan Maxamed oo hayay talada 2005 ilaa 2008 ayaa ahaa nin aad loogu saleeyo inuu haysto kalsoonida Raisulwasaaraha Itoobiya ahna xubin xaaskiisu tahay Ethiopian. Waxaase lashirqoolay markii ciidanka Itoobiya lafashiliyay ee Hay'adaha Xuquuqul Insaanka iyo Wariyaal badan si qarsoodi ah ku galeen dhulka Soomalida Ogadeniya. Waxana lagu kiciyay Daauid iyo Ina iley. Waxa shaqadii laga xayuubiyay madaxweyne cabduulaahi isaga oo lagu eedeeyay karti xumo iyo nidaamki TPLF oo uu hirgalkari waayay. Waxa lagu badalay talada Madaxtinimada loo dhiibay Madaxweyne Daauid Maxamed Cali oo hayay talada 2005 illaa 2008. Madaxweyne Daauid waxa isna lagu kiciyay Madaxweynaha cusub ee hada talada haya Ina illay oo afganbiyay Madaxweynahi ka horeeyay isaga oo lagu eedeeyay inuu yahay nin aad u liita oo karti daran.

Cabdullahi Xasen, Daud iyo Ina ilay ayaa ah saddex ku shiraakaysnaa sidii loo xasuuqi lahaa shacabka somalida Ogadeniya arrintaas oo hayadaha Samafalka iyo kuwo xuquuqul insaanku ay ku eedeyeen xadgudubyo badan oo ka dhan ah bani aadanimada inay ka geysteen dhulka somalida Ogadeniya iyaga uu fulinya amaawirta Ciidanka Ethiopia. Da'aud iyo Cabdullaahi xasan midna lama xirin.

Majiro illaa hadda halmadaxweyne oo dhameystay 5 sano ee uu xaqa u lahaa inuu hayo talada maamulka Kililka 5aad ee gacan kusameyska ah. Ma jiro illaa hada hal madaxweyne oo si sharaf ah kaga tagay xilkii uu hayay.

Istiratajiyada Guud ee Kililka Dowlada Itoobiya u sameysatay ayaa ah mid lagu hor istaagayo rabitaanka Shacabka somalida Ogadeniya.

Dhulka somalida Ogadeniya waa dhul aad u dib dhacsan dhanka horumarka, maamulka deegaanka somalida ee hoostaga Ethiopia awood uma laha ay ku dhisaan ama ku horumariyaan. Waxa illaa hada taagan mashruucyadii dowladi hore ee Dergiga Mengistu Xeyle marium uu soo qorsheeyay sida dhisida Damka Godey oo illaa hadda wax lataaban karo ka jirin.

Waxa kaliya ee loo ogolyahay maamulkan inuu qabto ayaa ah wax ay ugu yeeraan nabad galyada iyada oo Budgetka ugubadan ee kililka uu ku baxo sameynta ciidamo malayshiyaad ah oo laga soo aruuriyo beelaha somaliyeed. Kuwaas oo amar lagu siiyo inay la dagalamaan jabhada ONLF.

Si ay u hesho maamulo lamida ka kililka 5aad dowlada itoobiya waxa ay dhiiri galisa Maamulada gobalaysi ee ka jira Somaliya sida Waqooyi , Bari ama koonfur halkaas oo ay ka codsato in shacabka somalida ogadeniya ee soo qaxa kanasoo kafakada cadaadiska adag ee Ethiopia in laga soo qaqabto Gobalada somaliya oo gacanta loo soo galiyo dowlada ethiopia.

4: Hagardaamada Gumeysi iyo Gobolada Somaliya:

Wakhtigii Shacabka Soomaalida qeybo kamid ahi ay heleen Xoriyada waqooyi iyo Koonfur. Soomalida Ogadeniya maysan nasiib u helin inay ka hoos baxaan gacantii gumeysi illaa hadana waxa ay kujiraan cadwogii hoostiisa. Nasiib wanaag Dowladihii Soomaaliya maamuladi talada isaga danbeeyay iyo shacabka Soomaliyeed marna maysan ka tanaasulin inay gacan ka geystaan walaalahooda dhibban. Fagaaraha caalamka waxa ay uga doodeen in aan lakala qeybin Karin dad isku jinsi ah oo isku af ah. Waxayna si xoogan ugu dagaalameen sidii dhulka Guumeysiga ku jira ee Ogadeniya xorriyad loo siin lahaa.

Mudadii Dagaalkii sokeeye kadib Shacabka Soomaliyeed waxa uu noqday mid tabar-daran oo dagaalo sokeeye ku habsadeen waxa luntay dowladii u dhaxaysay Ummada Soomaliyeed. Waxa cadowga Guumeysiga ahi uu helay waqti iyo awood qeybi oo xukun ah oo uu rabo walaalaha soomaliyeed inuu iskudiro hawadana uu ku laalo dowlad Soomaliyeed oo xaq ah oo dhalata.

Guumeysiga Itoobiya waxa ay heleen Maamulo Goboleedyo Soomaliya ah oo ay iyagu gacanta ku hayaan siyaasada ay ku howlgali arintaasi waxa ay ka hor timid hadafkii Ummada Soomaliyeed ee ahaa in aan waxba lala wadaagin Guumeysiga inta uu guumeysanayo ummad Soomali ah.

Maamul Goboleedyada Soomalida ah ee Puntland iyo Somaliland waxa ay geysteen ama ka qeyb noqdeen Gumeysiga Itoobiya. Waxa ay si toos ah ula shaqeeyaan sirdoonka Itoobiya iyaga oo la saxeexday xeerar ka dhan ah Ummada Soomalida Ogadeniya oo lagu waxyeelaynayo dadka maatida ah ee usoo qaxa dhulkaas. Arintaas oo sababtay in xidhiidhka Shacabka walaalaha ah ee Soomaliyeed ee Somalida Ogadeniya laleeyihiin Waqooyi iyo bari ay gaadho meel aad u adag. In Shacab badan oo Soomalida Ogadeniya ah ay ka qaxaan dhulkaas isku socodkii iyo ganacsigiina uu aad u yaraado marmarka qaarkoodna istaago.

Markii u horeysay taariikhda ummada Soomaliyeed dad sheeganaya inay yihiin masuuliyiin matala shacab soomali ah ayaa waxa ay ku xad-gudbeen shacab aan wax dhibaato ah u geysan iyaga oo raali ahaansho kaga raadsanaya iyo aqoonsi dolwada Gumeysiga Itoobiya. Waxa ay ku kaceen dhaqan aan soomalida horay loogu baran oo ah in caruur iyo haween laga gato Guumeysiga Itoobiya

Dowlad goboleedka Puntland waxa ay suurto galisay in Ciidanka itoobiya ay u gacan galiyaan shacab badan oo Somali ah iyo Siyaasiin ka mid ah Ururka ONLF. February 2008 poliska maamulka puntland waxa ay qabqabteen qaxoonti kasoojeeda somalida Ogadeniya oo xabsi galiyeen. Muddo kadib waa sii daayeen dadkaas aan waxba galabsan qof mooyaane. Qofkaas oo ay ku jidh-dileen xabsiga iyaga iyo sirdoonka dowlada Itoobiya. 11 April 2008 Waxa uu ku dhintay xabsiga dhexdiisii dhaawac kasoogaadhay jidh-dilkii loo geystay.

Xubin katirsan Golaha dhexe ee ONLF iyo gudida Fulinta ee ONLF oo u tagay wada hadal dhulka Puntland si ay ula hadlaan sababta ay shacabka soomalida Ogadeniya ee qaxootiga ah loo dhibaateyano. Maamulka Puntland waxa uu go'aansaday in ay qabtaan waxayna u gudbiyeen Dowlada Ethiopia bishii April 11, 2008. Mudadaas kadib waxa kale oo ay qaqabteen dad ka badan 10 qof oo qaxooti ku aha dhulkaas oo ay u gudbiyeen dowlada ay kasoo qaxeen. 5 qof oo kamida waxa ka hadlay Congressman Donald Payne oo ugu baaqay Maamulka Puntland inay ka waantoobaan talaaboyinka foosha xun ay gaysanayaan.

Maamulka Somaliland ayaa isna waxa uu qaatay talaabo aan horey qof soomali ah uga suurto galin. Waxa ay qabteen Haweenay Hooyo ah oo dhulkaas ku joogtay magangalyo iyada oo heysata kaarka qaxoontiga ee UNta ee dadka maxaabiista ah lasiiyo. Bisharo wacdi waxa ay aheyd haweenay aan wax danbi ah ka galin sharciga soomaliland balse waxa maamulkaas doorbiday haweenay inay ka ganacsadaan si Itoobiya ay uga helaan hub iyo aqoonsi.

Hadaba Dowlada Itoobiya sababta ku kalifaysa in shacabka somalida Ogadeniya ay kula dagaalanto Gudaha Somaliya ayaa waxa sabab u ah isku day balaadhan oo ay rabto inay dagaalka ururka ONLF kula jiraan shacabkuna ku raacsanyahay in lagu wajaho Soomaliya. Dhibaataada iyo dhaqanka horey loo arag ee Dowlada Itoobiya ku qasbyso Maamul Goboleedyada Somaliya hadii ay fulin waayaana ay ugu hanjabayso in xilka laga qaadayo aqoonsina aysan ka heli doonin dowlada Somaliya.

Waxaa sidoo kale ay dowlada Itoobiya sameysay dad kasoo jeeda Soomalida Ogadeniya oo ku dhawaaqaya Halganka aan ku jirno waxa ka muhiimsan inaan lagalno halgan Soomalida. Waxayna taas dhalisay in ay timaado fikrad dadka lagu khalkhaliyo oo ah. Itoobiya aan la heshiino, Itoobiya waxa ay inoola dagaalaysa waa xabada aan kula jirno. Maanta Soomali waa isdhiibtay Itoobiya loowada tartamaya Shariif iyo Sheekh yaan la inooga badin.

Sidoo kale waxa ay keentay in ay dadkaas ku doodaan in Hadii Dolwada Itoobiya ay shacabka Somalida Ogadeniya la heshiidaan in ay Somalida Ogadeeniya ay masuul uga noqon doonto guumeysiga Itoobiya Soomaliya. Oo ay iyagu muqdisho Madaxweyne ka noqon.

Cadaawada intaas le'eg ee ay Dowlada Itoobiya ka dhex abuurayso walaalaha Soomaliyeed ayaa illaa hadda shacabka soomalida Ogadeniya ay dhagaha kafureysteen kuna wajaheen dagaalkooda inuu yahay mid ku aadan cadowga kaliya ee Soomaliyeed waa Guumeysiga Itoobiya.

Dhowaaqaas faraha badan waxa kamid ah in lasameeyo ONLF cusub sidii 1998 kuwaas oo sheegta inay dowlada Itoobiya heshiis dhexmaray. Waxa kale oo fikradan sii xoojiyay ururka Al itaxaad ee magacooda u badashay UWSLF ee isu soo dhiibay Itoobiya. Ururkan oo hadaf islaami ah ku dagaalami jiray ayaa sheegay sababaha uu halgankoodi usii socon waayay inay kamidtahay inaysan heysan meel ay ku badbadaan oo Soomalidina dhan kaladagaalamayso sidaas awgeed in aan cadowgayaga la heshiino ay qasab nagu tahay.

Shaxdan hoose ka aqriso tiro kooban oo kamid ah Siyaasiyiin iyo Shacab laga soo dhiibay Dhulka Soomaaliya oo loodhiibay Ethiopia.



Bishaaro Wacdi oo aheyd Hooyo loo dhiibay dowlada Ethiopia iyada oo laga qabtey magalada hargeysa.



Bishaaro oo ka muuqato jidh dil loo geystay.

Appendix II- list of names of refugees refoulement to Ethiopia- not exhaustive
List of Ogaden Refugee Refoulement to Ethiopia

No.	Name	Date	Place/Area	occupation	status
1	Mr. Abdulahi Qaji	1996	Somaliland(Hargeisa)	ONLF CC member	Released after 5 years in Prison

2	Mr. Abdulahi M. Xaliye	1996	Somaliland(Har geisa)	ONLF member	Released after 11 years in Prison	
3	Mr. Ahmed Mohamed Garjubi	1996	Somaliland(Har geisa)	ONLF CC member	Released after 5 years in Prison	
4	Mr. Yusuf Hersi Ollow	1996	Djibouti	refugee	Died in detention	
5	Mr. Abdinasir Aw Muhumed	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
6	Mr. Hariir Mohamed Dool	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
7	Ms. Nimo Badel (Bogyar)	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
8	Mr. Kaad Haybe Saahid	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
9	Mr. Bashiir Sh. Cabdulahi.	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
10	Mr. Mahad MOhamed	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
11	Ms. Firdosa Jama Dhungale	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
12	Mr. Abdi Nasir Ahmed	2008	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
13	Mr. Khadar Abdi Didsan	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
14	Mr. Sh. Mohamed Sh. Ali.	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
15	Mr. Jawhar Sh. Bashiir.	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
16	Mr. Mohamed Aw Aden.	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
17	Mr. Muhumed Abdi Aar	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
18	Mr. Ahmed Dool Mohamed	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
19	Mr. Urur Mohamed Abdi	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
20	Mr. Abdi Beddel Abdi	2007	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
21	Mr. Sh. Mohameded Abdullahi Budhjabay	2009	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
22	Mr. Mahamud Abdi Barre	2009	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
23	Amar Hussein Abdulahi	2009	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
24	Ms. Shamsa Xassan	2009	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
25	Mr. Hashi Ahmed Dhicis	2009	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in
26	Mr. Abdi Naasir	2009	Somaliland(Har geisa)	refugee	Detained Ethiopia	in

27	Mr. Lasgalool Hassan Iidoor	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
28	Mr. Ahmed Siyad	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
29	Mr. Abdulahi Sahid	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
30	Mr. Mohamed Mohamud ilkacase	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
31	Mr. Hassan Abdi kare	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
32	Mr. Ahmed Mohamed dhere	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
33	Mr. Kamil Ahmed Nasir	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
34	Mr. Mohamud Qaroyare	2009	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Detained in Ethiopia
35	Mr. Hussein Ahmed Aydrus	1996	Djibouti	refugee	Disappeared
36	Mr. Elmi Ahmed	1996	Djibouti	refugee	Disappeared
37	Mr. Abdiqadir Dahir	1996	Djibouti	refugee	Disappeared
38	Mr. Abdikarim Hussein Hassan	1996	Djibouti	refugee	Disappeared
39	Mr. Hiis Muse Jama	2005	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Death by Torture Hargeisa Prison
40	Mr. Ahmed Mohamoud Hussein	2005	Somaliland(Hargeisa)	refugee	Death by Torture Hargeisa Prison
41	Mr. Abdullahi Ahmed Aqib	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
42	Abdullahi Gani Ali	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
43	Abdiaziz Muhumed	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
44	Abdullahi Ahmed Mohamed	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
45	Yusuf Mohamed Adan	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
46	Asad Mohamed Abdullahi	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
47	Bashi Mohamed Hassan	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
48	Mohamed Mohamed	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
49	Abdirahman Hared Alaki	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
50	Geesh Olad	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia

51	Anwar Sheikh	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
52	Arab Garwah	2005	Somaliland(Hargeisa)	Refugee	Killed in Ethiopia
53	Abdinur Mohamed Soyán	2008	Puntland(Garowe)	EC ONLF	Detention Ethiopia
54	Dire Afi Elmi,	2008	Puntland(Garowe)	CC ONLF	Detention Ethiopia
55	Abdullahi Ali Mohamed Farah Good	2008	Puntland(Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
56	Farah Good	2008	Puntland(Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
57	Omar Sheikh Mohamoud	2008	Puntland(Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
58	Abdiyare Haybe Omar	2008	Puntland(Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
59	: Abdinur Siyad Ismail	2008	Puntland(Garowe)	refugee	Died by torture Bosaso
60	Abdi Hassan Yusuf also known as Terso	2009	Puntland(Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
61	Abdullahi Hassan Ali	2009	Puntland(Garowe)	refugee	Died by torture Bosaso
62	Faseh Atab Olad	2009	Puntland(Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
63	Muhumed Sheikh Badri	2009	Puntland(Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
64	Abdi Mohamed Deq	2009	Puntland (Garowe)	refugee	Detention Ethiopia
65	Mr. Bashir Ahmed Makhtal	2007	Kenya	refugee	Detention in Ethiopia

5: Xasuuqa iyo Tacadiga Balaadhan ee Dowlada Ethiopia ugeysato Soomaalida Ogaadeeniya:

Tacadiga iyo xasuuqa shacabka Soomalida ah ay Dowlada Itoobiya u geysato waxa uu bilowday waqti aad u dheer laga soo bilaabo Minilik qarnigii 19aad. Waxa dhibaatan si toos ah ay ugu geystaan caruurta, haweenka iyo waayeelka. Waqtigii ay abbysinia qabstay Harar waxa Abbysina ay bilowday inay duulaamo ay kusii dhulbalaadhsanayaan ay qaadaan oo weerarkooda kusii wadaan Soomaalida Ogaadeeniya.

Qoraal warqad ah oo uu diyaariyay Mr P bertie 1893 oo uu u diyaariyay Wasaarada arrimaha ee Dibada ee UK. Waxa uu sheegaya in Abbysinia ay si joogta ah duulaan ku qaadaan Dhulka somalida Ogadeniya ee inaga ina hoos jooga. Waxa cabasho ugudbiyay colonel Stace oo dhowr jeer waraaqo u qoray Rasmokonen waxana loo sheegay gardarada iyo duulaanka ay ku hayaan shacabka iyo dhulka Somalida Ogadeniya inay ka hor imaanayso ama dhibaato ku keenayso Britishka. Balse waxa wararku cadeynayaan inay wali Abbysinia ay sii dhiiri galinayso oo jibaartay weerarada cadaadiska duleynta ah ee ay ku hayso shacabka somalida Ogadeniya ee hoos jooga Britain. (*Fitzgibbon, 1982:23*).

Donalson Smith oo ah Nin Mareykan ah ayaa waxa uu booqday tuulada Sasabane 1894, isaga oo warbixin siinaya Royal geographical Society waxa uu yiri Waxaad qiyaasi kartaan calool xumadayda aan ka damqaday markaan maqlay maalmo yar uun kadib in Ciidamada abbysinia ee hoos yimada Mokonnen uu soo weeraray Sasabane xoolahoodii oo dhana laga qaatay, Gabdhihii iyoo Wiilashii adoonsi loo qafaashay, Dadkii waaweynaana laga yeelay wax la dilay ama la xiniyo siibay. (Fitzgibbon, 1982:23).

Dr Smith Waxa kale oo warbixintiisa uu kudaray in qowmiyada Oromada iyaguna ay dhibaato ba'an oo bani aadanimada kasoo horjeeda laguhayo sida Soomalida. Islamarkasna waxa uu ugu baaqay caalamka dadka jecel nabada in lagasoo gaaro Cawaankan hubaysan ee Abbysinianka ah ee ku duulaya darsikooda Afrikaanka kale ee aan isdifaaci Karin isaga oo sheegay in Somalida iyo Oromadu ay ku suganyihiin dhibaatadii ugu ba'neyd ee ummad soo gaarta. (Fitzgibbon, 1982:23). Sir Albert oo booqasho ku tagay 1897 ayaa waxa uu yiri Hadaan nahay Biritish waxa aan ka hor istaagnay ummada Somalida Ogadeniya iyo Oromada inay helaan hub ay isku difaacaan waxana u saamaxnay in Abbysinia oo aan iyadu garasho kale iyo shaqotoona laheyn oo aan ka aheyn inay weerarto oo soolayso somalida iyo oromada. (Fitzgibbon, 1982: 24).

Waqtigii Xayle selassie sidoo kale Shacabka soomalida Ogadeniya waxa lagu hayay cadaadis kasii xoog badan kii Minilik. Matalan September 1948 ciidamada Itoobiyaanku waxa ay si naxariis darro ah ku horistaagen kacdoon looga soo horjeedo heysashada Itoobiya: waxa magaalada jigjiga kaliya lagu toogatay 25 qof. (Fitzgibbon, 1982: 42).

1961 ciidamada itoobiya waxa ay duqeeyeen magaalada Ayshaca, Dhagaxbuur iyo Qalaafo halkaas oo ay ku dileen boqolaal shacab ah. 1963 tuulada Tuug Kalkaal waxa ciidamada Itoobiya iyaga oo baadi gob ugu jira masuuliyiinti kasoo horjeeday guumeysiga weerar ku qaadeen tuuladaas. Sidii caadada u aheyd boobkii iyo dilkii lagu yiqiinay markan ciidamada Itoobiya waxa ay lasoo baxeen laba qof kuwaas oo ay kurka intay ka jareen ay kurkoodii usoo qaateen magaalada Qabridahare si ay dadka u cabsigaliyeen una duleeyaan...(Kenyan, 1990:9)

Waqtigii Mangistu sidoo kale ummada soomalida Ogadeniya waxa saarnaa cadaadis xoogbadan waxa Mangistu isaga oo soo qaadanaya nidaamki Stalin uu isku dayay inuu baro kiciyo shacabka Somalida Ogadeniya isaga oo sameynaya in dadka la dajiyo goobo si koox koox ah oo lagu qasbayo. Sidoo kale waxa uu duqeymo circa ah iyo dhulkaba u geystay magaalooinki halkaas oo inkabadan million shacab ah uu ku qasbay inay kaqaxaan wadanka waxii soo harayna waxa uu saaray ciqaabo isugu jira gaajo abaaro iyo takoorid caalamka laga takooro.

Dowlada Cusub ee Tigre Hogaaminayo waxa ay wadanka qabsadeen 1991 markii uu dhacay mangitu Xayle mariyaam. Waqtigaas waxa dhulka Soomalida Ogadeniya kusoo qulqulayay boqolaal kun oo Somalida Ogadeniya ah oo kasoo qaxay Dagaalka Sokeeye ee Somaliya. Dadkaas waxa ay aad ugu niyad wanaagsanaayeen inay wadankooda kusoo laabteen waqti isbadal dhacayo oo Guumeysigii ay ka qaxeen uu isna firdhad yahay. Dowlad cusub oo loo haystay in iyaguna ay dhibaato gumeysi soo mareen wadanka qabsadeen.

Markii ugu horeysay waxa Soomalida Ogadeniya ay kamid noqdeen inay sameystaan xisbiyo matala danaha ummada Soomalida Ogadeniya. Waxa ay sameysteen doorasho, iyaga oo tixgalinya sharciga dowlada Federaalka sameystay ayay waxa ay Baarlamaanka Soomalida Ogadeniya waxa uu gudbiyay codsi ah in Shacabka Somalida Ogadeniya laga qaado afti, maadama aan waligood laweydiin rabitaankooda.

Dowlada Itoobiya oo awal horeba kawarheysay rabitaanka Ummada somalida Ogadeniya balse sugaysay inta ay wadanka kawada qabsaneyso oo awood ka yeelanayso markii ay aragtay inay talaabo ka qaadi karto Soomalida Ogadeniya. Waxa ay ka hor timid dhamaanba codsiyada

Baarlamaanka Somalida Ogadeniya waxayna xabsi u taxaabtay madaxdii dhulka Somalida Ogadeniya oo ay ka yeeshay wax ay xidho iyo wax ay disho.

Taliska TPLF/EPRDF waxa uu qaatay talaabooyinkii Dowladihii ka horeeyay ee uu dhaxlay. Waxa uu ka horyimid qodobada sharciga federaalka ee u qoran. Waxa uu baadi goob ku bilaabay dhamaanba ururada ummada Somalida Ogadeniya Sida ONLF, IGLF iyo Al Itihaad. Waqtigaas iyada ah waxa dowlada Somalida Ogadeniya hogaaminayay ururka ONLF oo ku guuleystay doorashada 80% kursiga baarlamaanka Somalida Ogadeniya.

Sidii caadada u aheyd ee lagu yiqiinay dowladihii hore ee Guumeystaha Abbysinia, Ihaadhi waxa ay bilowday xasuuq ay u geysato shacabweynaha Somalida Ogadeniya iyada oo aan ukala aabo yeelin Sheekh, aqoonyahan, Siyaasi, Caruur waayeel iyo haween toona.

Magaalada Wardheer oo gudomiyaha Ururka ONLF Sheekh Ibraahim Cabdalla ka qudbeeynayo ayaa weerar ay ku qaadeen shacabkii magaalada Wardheer halkaasna waxa ku shihiiday 81 qof 17 qof oo kalena waa ay ku dhaawacmeen. Shacabka Soomalida Ogadeniya waxa ay ka dhiidhiyeen gardarada cad ee guumeystaha waxa ayna door bidden inay difaacaan gudoomiyahooda halkaasna waxa ay ku fashileen iskudaygii cadowga ee ahaa in si dhibyar loo laayo lana qaabto madaxda Ururka ee u taagan halganka soomalida Ogadeniya. Woyaanuhu waa ku fashilmeen isku daygaas shacabkii aan hubaysneyn ee ku dagaalamayay dhagxaanta iyo ulaha waxa ay kaga jiraan taariikhda Soomalida Ogadeniya baal dahab ah aakhirona waxa ay aadeen janadii oo gacan ka xaqdaran ayay ku shahiideen.

Ciidadama tigreega ee gaystay danbigaas illaa hada lama soo istaajin maxkamad dowlada Itoobiya wallow ay qirtay in dagaalkaas ay geysteen raali galin kama aysan bixin.

Dadkii Xasuuqaas ba'an ku dhintay waxa kamid aheyd Gabadh u shaqeynaysay Ogden Women Democratic Association. Degmo axmed Cali waxa ay aheyd dhaawac markii ciidamada itoobiyaanku ay u qaateen xerada ciidanka ee Wardheer kadibna waa ay gubeen iyada oo nool saas ayayna ku shihiiday gabadhaas. Waxa kamid ahaa oo kale dadkii meeshaas ay ciidamada Itoobiya ku xasuuqeen Abshir Cali Dhuux duqa Magalada Qoriile, Xakiim Xirsi Cabdulle Duqa Magaalada Caado. Magacyadan hoose waxa ay kamid yihiin dadkii lagu xasuuqay magaalada Wardheer.

- 42 Abdi Ismail Osman Wardheer Civilian 22.02.94
- 43 Abdi Mohamed Anshur Wardheer Civilian 22.02.94
- 44 Abdi Mohamed Salah Wardheer Civilian 22.02.94
- 45 Abdi Muhumed Rooble Wardheer Civilian 22.02.94
- 46 Abdi Shafi'i Aw-Hussein Wardheer Civilian 22.02.94
- 47 Abdi-aziz Mohamed Jirow Wardheer Civilian 22.02.94
- 48 Abdi-weli Hassan Ibr. Wardheer ONLF Danood head 22.02.94
- 49 Abdirizaq Dego-weyne Wardheer Civilian 22.02.94
- 50 Abdullahi Sh. Mohamed S. Wardheer Civilian 22.02.94
- 51 Abshir Aw-ali Dhuh Wardheer Qorile Mayor 22.02.94
- 52 Ahmed Dahir Rabbi Wardheer Civilian 22.02.94
- 53 Ahmed Gaweto Wardheer Civilian 22.02.94
- 54 Ahmed Ibrahim Nur (Dakal) Wardheer ONLF member 22.02.94
- 55 Ahmed Rabbi Addawe Wardheer Civilian 22.02.94
- 56 Ali Ahmed Eray Wardheer Civilian 22.02.94
- 57 Basargeh HusseinDheg Wardheer Civilian 22.02.94
- 58 Bile Abdi Qamman Wardheer Civilian 22.02.94
- 59 Bishar Ahmed Omar Wardheer Civilian 22.02.94
- 60 Deeq Aw-Ahmed Salim Wardheer Civilian 22.02.94

- 61 Fajas Hussein Ali-Gaas Wardheer Civilian 22.02.94
- 62 Farah Ali Sarman Wardheer Civilian 22.02.94
- 63 Feysal Ahmed Farah Wardheer Civilian 22.02.94
- 64 Ganey Omar M. Hussein Wardheer Civilian 22.02.94
- 65 Hakim Hersi Abdille Wardheer Aado Mayor 22.02.94
- 66 Hamdi Adan Wardheer Civilian 22.02.94
- 67 Hayi Mohamed AbdiDahir Wardheer Civilian 22.02.94
- 68 His Ahmed Omar (Maganyol) Wardheer Civilian 22.02.94
- 69 Ibrahim Dhabar Hassan Wardheer Civilian 22.02.94
- 70 Mahaad Shukri Garweyne Wardheer Civilian 22.02.94
- 71 Mohamed Abdi Dheere Wardheer Civilian 22.02.94
- 72 Mohamed Hassan M. Omar Wardheer Civilian 22.02.94
- 73 Mohamed Osman Isse Wardheer Civilian 22.02.94
- 74 Mohamed Qani Abdi Wardheer Civilian 22.02.94
- 75 Mohamed Warsame Wardheer Civilian 22.02.94
- 76 Mohamed-Deeq Muh. Hassan Wardheer Civilian 22.02.94
- 77 Muse Ahmed Yahye Wardheer Civilian 22.02.94
- 78 Omar Hassan Garuf Wardheer Civilian 22.02.94
- 79 Rabi'i Tahar S.Ali-Safi Wardheer Civilian 22.02.94
- 80 Weli Abdi Sh. Adan Wardheer Civilian 22.02.94
- 81 Yusuf Ga'an Wardheer Civilian 22.02.94
- 82 Yusuf Haybe Abdi (Gurey) Wardheer Civilian 22.02.94

Magaalada Dhagaxbuur waxa Ciidamada tigregu ku toogteen Maxamed Sheekh Muxumed Iraad oo kamida Golaha dhexe ee Ururka ONLF 20 May 1992. Waxa ay ku toogteen keelaga meesha laga soo galo magaalada Dhagaxbuur iyaga oo u diiday inu sixxor ah inuu kuso galo magaalada Dhagaxbuur. Waqtigaas ururka ONLF waxa uu aha ururka talada hayay oo howlgalayay. Dilkaan waxa uu ku tusinayaa in Ciidanka TPLF ay horey usii gaashaanteen wadankana inay ku heysteen xoog ay ugutalo galeen.

Maxamed Cumar tube iyo deeq Maxamed Carab waxa ay ku toogteen suuqa magaalada Qabridahare 5 Galabnimo 12 february 1994. Labada mujaahid waxa ay kala ahaayeen Komishineerka Booliska iyo ku xigeenkiisa ee Qabridahare.

Kaafi Cali Yuusuf iyo 9 xubnood oo kale oo lasocda ayaa ciidnaka tigreegu waxa ay ku joojiyeen meesha laga galo Gari'go'an waxayna u qaadeen xabsi ku yaala Qabridahare. Markii ay ogaadeen Kaafi Yuusuf Cali inuu yahay Gudida Fulinta ee ururka ONLF waxa ay ku qasbeen inuu qoto xabaal inta aasan la dilin ka hor. Halkaas Kaafi waxa ay jidh dileen ilaa uu ka nafbaxay oo ku rideen xabaashi uu isagu qotay.

1994 ilaa 2006 Waxa dhulka Soomalida Ogadeniya ka jiray xasuuq balaadhan oo aan caalamkana laga warqabin. Maadama saxaafada caalamka loo ogoleyn inay galaan dhulka somalida Ogadeniya.

June 2007 waxa markii u horeysay si dhuumasho ah ku tagay Jeffrey Gettleman oo ah Agaasimaha Warbaahinta New York Times ee Geeska afrika fadhigiisuna yahay Nairobi Kenya. Waxa uu kawaramay kufsiga iyo sida ay ciidamada Itoobiyaanku rabitaankooda xasuuq ugu geysanayaan shacabka Soomalida Ogadeniya. Waxa kale oo uu soo saaray Muuqaalka sawiro iyo filim ka hadlaya halganka ay ku jiraan Soomalida Ogadeniya. Halkan ka daawo <http://www.youtube.com/watch?v=B2UsCzim6cc>

11 June 2008 Waxa haayada Xuquul Insaanka ee Human right Watch ay soo saartat buug 130 boga oo loogu magac daray “Collective Punishment; War Crimes and Crimes against Humanity in the Ogaden area of Ethiopia’s Somali Region. Warbixintan ayaa ka hadlaysa xasuuqa ba’an ee ciidamada Itoobiya ay ku hayaan shacabka Somalida Ogadeniya.

Warbixintu waxa ay soo saartay magaalooyin ciidamada Itoobiyaanku ay gubeen, warbixintan oo ay ka wareysteen dadkii dhulkaas daganaa ee kasoo qaxay ayaa hadana waxa ay cadeymo ku soo saareen Satellite sawiro ay u qaadeen shirkada AAA’s oo cirka kasoo musawirtay.


Waxa ay warbixintu sheegtay in ciidamada Itoobiya May illaa June 2007 in dhamaan magaalooyinka ay kaga baxaan 2 ilaa 7 maalmood qofkii aan ka bixina in la dilli doono amar ah ayay siiyeen dadka dagan tuulooyinka dhulka somalida Ogadeniya oo ay ku eedeeyeen inay taakulo siiyaan Ururka Jabhada Wadaniya Xoreynta Ogadeniya. Shacabka Somalida Ogadeniya waa ay ka dhaga adeegeen warbixintaas waxana dhacday muddadii marki lagadhay in ciidanka Itoobiya goobihii yimaadeen oo ay xasuuqeen dadkii ay ugu yimaadeen, haddey caruur yihiin iyo gabdho waa ay kufsanayaan.

Sanadkii 2007 Bishii May ilaa June tusaale ahaan Gobolka Doollo, hadaan soo qaadano dhamaanba magaalooyinkii u dhowaa wardheer oo dhan ayaa ciidanka Itoobiya ay baro kiciyeen dadkii daganaa 60 Kilometer radius agagaarka magalada wardheer oo dhan oo ay kamidyihin tuulooyinka Daratoole, Lahelow. Dhammaanba Tuulooyinkaas oo dhan waa la gubay kadib markii labarakiciyay dadkii dagganaa goobahaas. Ficiladaas oo kale ayaa waxa ay ka dhaceen guud ahaan dhulka Somalida Ogadeniya sida Garbo, Dhagaxbuur, Sagag iyo Shilaabo.

Magaalada Qammuuda ayaa Sattelite ay istimaashay Haayada Xuquuqul Insaanka Human Right Watch ayaa sawirada Sattelite ku waxa ay soo saareen gooba lagubay magaladaas iyaga oo isbarbar dhigay laba sawir oo midna laqaaday 2006 midna sanadkii 2008. Sawirka 2008 ayaa tilmaamaya 87 Guri oo la dumiyay ama lagubay markii loobarbar dhigo muuqaalki hore 2006.


Muddo laga joogo Todobaad maalinkii ay ciidamada Itoobiya ay gubeen tuulada Qammuuda waxa ay ciidankaas u gudbeen magaloyar oo kale oo qammuuda ku xigta oo lagu magacaabo Jalleelo oo ka tirsan Shillaab. Qof goob joog ahaa waqtigaas ayaa u sheegay HRW in ciidamada Itoobiya ay dageen Jalleelo muddo laba maalmood ah halkaasna ay xoog ku qasheen adhi tiro badan oo ay ka xoogeen shacabkii dagan. Waxa dabadeeto shacabka ay ku qasbeen inay ka guuraan Jalleelo waxayna qabadsiiyeen guud ahaanba tuulada Jalleelo.

Daawo Sawirka Qammuuda ee AAA’S Satellite qaaday 2006 muuqaalka magalada.



Qamuuda- March 24, 2008: About 85 structures were likely removed or damaged when compared with the previous image. © 2008 DigitalGlobe. Qamuuda- December 23, 2006 (Lat: 6.543; Long: 44.903) ©2008 DigitalGlobe

Daawo Sawirka AAAs qaaday 2008 ee magaalada Qamuuda dhismaha la gubay



Sawirkaas kore goobaha calamada buluuga ah waxa ay ku siinaysaa guryaha ka dhisan magalada qammuuda. Sawirka labaad ee hoose waxa uu ku tusinayaa goobaha la gubay ee calamada mugdiga ah.



Rudwaan Hassan 17 Sano jirta ayaa ka badbaaday Xasuqi Qorile July 2007.

Wargeyska Independent ee kasoo baxa wadanka Britain ayaa waxa uu ka warbixiyay sida loogubay Magaalada Qamuuda iyo ciqaabtii lamariyay shacabka daganaa. Wariyaha isaga oo wareystay dad kasoo qaxay tuulada qammuuda waxa warbixintiisa uu kibiilaabay sidan.


Bishii June 2006 ayaa waxa ciidamada Itoobiya oo dhan 180 Askari ay allasay hore ku waa bariisteen magalaada Qamuuda iyaga oo xabbado cirka u ridaya. Ciidamada Itoobiyaanka ah ayaa sheegay inay baadi goob ugu jiraan ciidamada Ururka ONLF oo ay tuuladaas ku eedeeyeen inay siiyaan hoy iyo taakulo. Waxa ay halkaas khalkhal badan iyo cabsi badan galiyeen shacabkii dagana tuulada qammuuda iyaga oo la baxay 7 gabdhood uu da'doodu u dhaxeeyo 15 ilaa 18 jiro. Gabdhahaas oo ay u qafaasheen xero ay ka sameysteen tuulada korkeeda.

Subaxdii danbe ayaa waxa magaalada qammuuda ku soo tooseen meydka gabadh ka mida gabdhihii laqafaashay oo aheyd gabadhii ugu da'yareyd oo laga soo daldalay geed dheer, gabadhaas ayaa waxa jidhkeeda ka muuqday dhiig aad u badan iyo jidh dil. Aroortii danbe ayaa iyana gabadh kale waxa ay kasoo daldaleen gabadh kale geedkii. Hadana subaxdii saddexaad ayaa gabadh kale oo sidii gabdhihii hore loo jidhdilay lagu arkey geedkii iyada oo ka daldalan. Gabdhihii kale dib looma arag nolol iyo geeri meel ay jaan iyo cidhib ku danbeeyeen.

Shukri Cabdullaahi oo kawarbixinaysa qaabka loo dilay gabdhahaas ayaa sheegtay inay aysan waligeed illaawi doonin sidii gabdhahaas yar yar loo dilay, waxa ay ahaayeen gabdho aad u qurux badan. Waxa ay u sheegtay Wariyaha Guarida in habeen kasta ciidamada Itoobiya ay ku soo jabiyaan guryaha iyaga oo raadinaya gabdho ay kufsadaan. Aniga ma sugi karo inta ay ku dhacayso qof kamida ehelkayga sidaas awgeed waxa aan goostay inaan lasoo cararo caruurteyda. Shukri Cabdullaahi iyo 8 caruur ah oo ay dhashay waxa ay yimadeen dhinaca Xuduudka Somaliya iyaga halkaas 800 mile lug kumary kulayl iyo oomane aad u adag oo ay ku tageen magaalada Boosaaso.

Dhibaataada ka dhanka ah xuquuqul insaanka ee loo geysto shacabka somalida Ogadeniya ayaa taagan maalinkasta iyada oo xasuuqi ugu danbeyay ay u ka dhacay magalada Qabridahare. Halkan ka daawo dilka kufsiga iyo xassuuqa ba'an ee loo geysta shacabka aan isdifaaci karin warbixin ay Kowsar Cusman Badal ka bixineyso Shir ka dhacay Xafiiska Amnesty International 8 January 2011. http://www.youtube.com/watch?v=oEfdoBWwzi0&feature=player_embedded

6: Halgamadii La dagaalamay Guumeysiga Abbysinia:



Sawirka 1aad waa Jabhadi
Nasrullaah oo Wada dhawac. 1964

Abbyssinia waa dowlad ku dhisantay isbalaadhsi iyo caddaalad darro iyaga oo ku duulay dad iyo dhul xor ah oo ay daris yihiin. Abbyssinia waa boqortooyo ay iska leeyihiin qowmiyada Semetic oo ka dhaxaysa qowmiyada Tigre iyo Axmaaro oo kolba qolo ay taliska qabato waxa ayna ka simanyihiin sidii ay ku qabsan lahaayeen dhulka dariska la ah ee Geeska Afrika. Waxa taliskan boqortooyada ahi uu bilaabay inuu kusoo duulo shacabka kushetic ee Oromada iyo somalida iyo qowmiyado badan oo dagan geeska Afrika iyaga oo kaashanaya Guumeysigi ree galbeedka.

Shacabka Somalida Ogadeniya waa dad somali ah oo islaam ah oo aan ogoleyn in ladulmiyo dadkale. Waxayna ka dhiidhiyeen Guumeysiga madow ee kusoo duulay dhulkooda dihin iyo dadkooda. Waxayna bilaabeen iska caabin ay uga hortagayaan dhaqanxumada guumeysiga madow uu ku rabo inuu dhul balaadhsi kusameeyo kuna dulmiyo ummad leh dhaqan iyo jiritaan taariikhi ah.

Waxa iska horimaadyada lala galay Guumeysiga Abbyssinia kamid ah Dagaalkii Ahmed Gurey ee qarnigii 16aad oo shucuubta islaamka ahi uga hortageen isbalaadhsiga iyo duulaanka Abbyssinia, taariikhdaas oo ah mid dheer oo dhaxal gal ah.

Sidoo kale qarnigi 19aad waxa Isbalaadhsiga Abbyssinia ka hortagay Daraawiishta oo uu hogaaminayay Sayid Maxamed Cabdulle Xasen. Oo u diiday in dhulka somalida ay soo gaaraan isbalaadhsiga abbyssinia.

Qarnigi 20aad iyo qarnigan 21aad wali waxa socda dadaalo looga hortagayo isbalaarsiga abbyssinia islamarkaasna lagu xoreynayo dhulka somalida ee ay xooga ku qabsadeen. Halgankan ayaa waxa horseed u ahaa Halgankii Nasrullah ee Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogadeniya (OLF). Jabhada OLF ayaa waxa ay howlgalkeeda bilowday 1960maadkii iyaga oo u doortay hogaamiye Garaad makhtal Daahir oo ay wehilanayeen rag badan oo uu kamid ahaa Sheekh Ibraahim xaashi.

Halganka ay waday Nasrullaah ayaa mowqifkiisu ahaa sidii xoriyad loo gaarsiin lahaa somalida Ogadeniya loogana saari lahaa Boqortooyada Ethiopia ee sida sharci darada ah ku timid dhulka Somalida ogadeniya. Halkaas oo ay dagaalo xoogan la galeen Guumeysiga madow. Jabhada waxa

halgankii ka dhaxlay Jabhadii WSLF oo halgankii sii waday iyaga oo taakulo balaaran ka helaya Jammuhiriyada Somaliya.

Jabhada wadaniga Xoraynta Ogadeniya oo iyagu ah ururka u dagaalamaya xorriyada shacabka soomalida Ogaadeeniya ayaa waxa ay gacanta lahaaleen qori-isudhiibkii tartanka loogu jiray xorriyada shacabka somalida Ogadeniya. Axmed Guray ma dhiman, Ma Gablamin Darwiishkii, Geenyadu Ma Daalana. Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogadeniya iyada oo eegaysa taariikhda Gumeysiga ee duulaanka, dhulbalaadhsiga iyo cadaadinta shacabka iyo taakulaynta ay ka heystaan caalamka.

Ciidanka ONLF:

Ciidanka Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogadeniya waa ciidan dhismihiisu bilowday ka dib markii Dowlada Ethiopia ay weeraro ku qaaday xarumaha Jabhada ONLF sanadkii 1994tii si ay u qabqabato Maamulka ONLF iyo siyaasiyiinta shacabka Somalida Ogadeniya. ONLF waqtigii ay ogolaatay inay ka mid noqoto dowlada federalka Ethiopia maysan laheyn ciidan balse waxa ay heysteen taagerada shacabka Somalida Ogadeniya iyaga oo doorashadi 1993 ay kusoo baxeen 98% codkii shacabka. Waxa markaas Ururka ONLF uu bilaabay iyaga oo ka faa'ideysanaya dastuurka Ethiopia ee ay ansixiyeen qowmiyadaha Ethiopia ee sheegaya in qowmiyad kastaba yeelato dowlad hoosaad u madaxbanaan shaqooyinkooda oo qowmiyad kastaaba wax ku qoranayso afkeeda hooyo islamarkaasna aayaheda ay ka tashan karaan. Iyaga oo dhaqan galinaya xeerka iyo dastuurka u qoran Ethiopia waxa si madaxbanaan ururka ONLF u bilaabay inuu ugu ololeeyo rabitaanka shacabka somalida Ogadeniya iyo sidii afti looga qaadi lahaa.

Dowlada TPLF dhinaca kale waxa ay u ololeeyeen in shacabka somalida Ogadeniya la kala qaybiyo oo ay helaan xisbiyo ka awood bata ururka ONLF iyaga oo sameeyay 12 xisbi oo ka horyimada ururka awooda badan ee ONLF waxana booqasho badan ku yimid madaxweynaha Ethiopia oo ahaa waqtigaas Meles Zenawi si arrintaas uu u hirgaliyo isaga oo wada hadal geesyo badan leh la galay odeyaasha somalida Ogadeniya. Odeyaasha Somalida Ogadeniya shirkii Huurso 1994 waxa ay si cad ugu sheegeen Meles Zenawi inuu shacabka somalida Ogadeniya ay dowladiisu u ogolaato Afti iyo Xoriyyadooda.

Meles Zenawi markuu ku guuldaraystay inuu badalo aragtida shacabka somalida Ogadeniya waxa uu amar ku bixiyay in weerar lagu qaado fadhiisimayasha taageerayaasha ururka ONLF iyo waxgaradka somalida Ogadeniya. Isaga oo sida ku cad shaxda xasuuqa 1994 uu xasuuq ba'an ka geystay si awoodiisa uu u muujiyo.

Weerarada lagu soo qaaday madaxda ONLF iyo taageerayasha ONLF waxa ay keentay in duurka ay galaan dhamaanba xubnaha Ururka ONLF iyo qofkasta oo amnigiisa khatar ku jiro. Xubnaha ONLF ma aysan laheyn xubno leh tababar ciidan oo ay ku gali karaan dagaal. Ma aysan heysan awood dhaqaale iyo mid ciidan. Waxana difaacay shacabka Somalida Ogadeniya si loo badbaadiyo Halganka xorriyad doon. Shacabku waxa ay ku hubeeyeen ciidanka ONLF qoryo yar yar. Waxa kale oo ay Ciidanka ONLF ku dhex noolaayeen oo ogaladay shacabka Somalida Ogadeniya ee Ree Guuraga ah iyaga oo u qala xoolaha islamarkaasna biyaha iyo caanaha ku soorya.

Taageeryasha ONLF ee isu badalay ciidan duur joog ah waxa ay awood u yeesheen inay naftooda badbaadiyaan si xor ahna ay ugu noolaadan baadiyaha. Waxa sitartiib tartiib ah ay u bilaabeen inay helaan awood tababar oo ay iyagu isku baraan sida loo rido qoryaha looguna dagaalamo noocyada dagaalka ee ku dhufo oo dhaqaaq iyo dhuumaaleysiga nooca afka qalaad loo yaqana (Gorilla War).

Dagaalka noocan ah ayaa waxa ay ka barten Odayaal kusoo jiray oo ka soo qaybgalay halgamadii hore ee Nasrullaah iyo Jabhadi WSLF.

Dagaalada noocan ah waxa ay jareen halbowlaha Ciidamada Ethiopia kuwaas oo isku socodkoodi la kala gooyay. Dagaaladan waxa ay Dowlada Ethiopia ku keentay inay ka guuraan Goobo badan oo ka mida Degmooyinka dhulka Soomaalida Ogaadeeniya. Iyaga oo Ciidamada Ethiopia ay isku aruursadeen Magaalooyinka waaweyn ee leh dhufeysyo ay isku difaaci karaan.

25 sano ka dib Ururka ONLF waxa uu ku guuleystay inuu helo ciidan awood xoogan oo dagaalo fool ka fool la gala ciidamada Ethiopia. Ciidankaas oo qorsheeya weeraro ay ku qaadayaan fadhiisimaha waaweyn ee Ciidanka Ethiopia iyo meelaha stratagiyada u leh ciidanka Ethiopia ee ku sugan dhulka Somalida Ogadeniya.

Dagaaladaas waxa ka mida Dagaalki Cobole april 2007 ee ay Ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee ONLF ay ku weerareen fadhiisimo ciidan oo ku yaala magalada Cobole oo ilaalo u ah goob shidaalka laga baadho.

Sidoo kale ciidanka ONLF waxa uu awood u yeeshay uu kaga howlgalo 9-ka gobol ee dhulka Soomalida Ogadeniya. Iyo in ay yeeshaan shuraako Jabahadaha kale ee ka howlgala Ethiopia sida Oromada. Kuwaas oo howlgalo ay kawada fuliyaan Dhulka Buuralayda sare ee Ethiopia.

Waxa Wadamada Dariska ah iyo Dolwada Ethiopia soo saareen Bishii September 2010 warar sheegaya in Ciidanka ONLF ay ku sugan yihiin Buuraha Maar-maar ee Gobolka Awdal. Arrintan oo ay Masuuliyiinta ONLF ku sheegeen inaysan waxba ka jirin lakiin Xoogag ka tirsan Ciidamada ONLF inay Dagaalo ka wadaan Gobolka Shiniile. Si kastaba ha ahaatee arrintan ayaa waxa ay tahay tusmo muujinaysa awooda Ururka ONLF ee ay Dhulka somalida Ogadeniya oo dhan ay uga howlgali karaan.

Dowlada Ethiopia ayaa qirtay xoogga Ciidamada ONLF, Ra'sal wasaaraha Ethiopia 2005 ayaa si caam ah uu ugu dhawaaqay in dowladiisu ay dagaal xoogan kula jirto xoogaga Ciidamada ONLF. Dagaalkaas uu raisal wasaaraha Ethiopia uu iclaamiyay ka dib waxa afahayeenka Dowlada Ethiopia uu soo saaray wareegtooyin bil kasta uu uga hadlayo dagaalada dhexmara Ciidamada Ethiopia iyo Xoogaga Ciidamada ONLF. Waxana labada dhanba ay sheegtaan in Ciidamo boqolaal ah ay kala dileen. Taas oo iyana muujinaysa Xooga Ciidan ee Ururka ONLF uu ku yeeshay Geeska Afrika.

Tirada ciidanka ONLF ma cadda inta ay le'egtahay waxase Wariyaha New York Times u ku qiyaasay kumanaan kun mar uu in muddo ah la joogay ciidanka ONLF. Waxa sidoo kale muuqaalka Ciidamo aad u tiro badan oo gaadhaya dhowr boqol lagu soo saaray Sawiro iyo muqaalo ay kasoo qaadeen suxifiyaal Ree Galbeed ah taas oo muujinaysa awooda Ciidan ee ONLF ay leedahay.

Ciidanka ONLF ayaa ah ciidan leh dhaqan iyo asluub wanaagsan taas oo siisay taageero xooggan iyo awood dheeraad ah. Waa Jabhadii somalida Ogadeniya ugu jiritaan dheereed ee dagaal toos ah ka wada dhulka soomaalida ogaadeeniya taas oo muujinaysa awooda ciidan ay leedahay Jabhada wadaniga Xoraynta Ogadeniya.

Siyaasadda ONLF



Gudomiyaha ONLF iyo Madax ka tirsan Ururka ONLF oo saxeexay kamid noqoshada Xubinimada Ururka UNPO. ONLF waxa ay ku biirtay UNPO 6 February 2010.

Jabhada ONLF oo ah jabhad ku tiirsan taagerada shacabka soomaalida Ogaadeeniya waxa ay dadaal dheer u galeen sidii ay shacabka somalida Ogadeniya ugu doodi lahaayeen uguna noqon lahaayeen codka shacabka ummada somalida Ogadeniya. Si taas u hirgasho Maamulka ONLF waxa uu dadaal u galay sidii Caalamka uu u gaarsiin lahaa dhibaataada shacabka somalida Ogadeniya. Waxa ay baaqyo kusoo saaraan xaalada xuquuqul insaan iyo tacadiyada ay ciidamada Ethiopia ka geystaan dhulka Somalida Ogadeniya.

Jabhada wadaniga Xoreynta Ogaadeeniya kumaysan ekaan Qori iyo xabbad balse waxay caalamka ku yaab galisay in fagaarayaasha caalamka ay lasoo fuulaan codkii qarsoona ee soomaalida Ogaadeeniya. Arrintan ayaa waxa ay siisay Jabhada ONLF inay hesho taageero caalami ah oo ay ka hesho shacabkeeda ku sugan wadamada Ree Galbeedka iyo guud ahaanba Somalida Ogadeniya ee ku sugan Qurbaha.

Waxaa bilowday dhaqdhaqaaqo siyaasi iyo mid Bulsho oo shacabweynaha Soomaalida Ogaadeeniya ay ku taageerayaan halganka ay hormuudka ka tahay ONLF. Waxaa abuurmay hay'ado u dooda xuquuqda shacabka soomaalida Ogaadeeniya oo ka madax banaan Siyaasadda.

Sidoo kale Ururka ONLF waxa uu muujiyay Siyaasadeedu inay tahay Ururkii matalayay shacabka Soomaalida Ogaadeeniya. Waxana dhaqankoodi yeeshay dhaqan nidaam dowli oo dhamaanba qodobada u yaala Jamciyadda Quruumaha ka dhexeysa buuxinaya. Halka Dowlada Ethiopia ay noqotay Dowlad jabisay dhamaanba qodobada Bani-aadanimo ee u yaala Jamciyadda Qurumaha ka dhexeysa ee ay horey u saxiixeen.

Siyaasada ONLF waxa ay noqotay siyaasadii shacabka Somalida Ogadeniya, taasna waxa ay keentay inay hesho taagero siyaasi ah oo ay ka helaan haayadaha qaramada midoobay, warbaahinta caalamka, iyo dhamaanba dadka jecel nabada iyo dimoqraadiyada.

Waxa ay maqunisay siyaasadi Ethiopia ee ree Galbeedka, waqti dhamaanba ummadaha islaamka ah ee xuquuqdooda u dagaala la xaqiray oo lagu eedeeyo argagaxiso Ayaa Ururka ONLF noqday ururkii ugu horeeyay ee Islaam ah ee la dagaala dowlad Kiristaan ah oo ka bad-baada Magaca Argagaxiso. Madaxda ONLF waxa ay heleen macsumado ay uga qayb galaan kulamada caalamiga ah ee ka socda wadamada Ree Galbeedka. Waxa ay kulamo la qaateen madaxda iyo masuliyiinta Wadamada USA, France, UK oo ay uga dhaadhicinayaan qadiyada Somalida Ogadeniya.

Siyaasada ONLF ayaa waxa ay kumuujiiyeen sawirka ah: Waxa aan rabnaa aftida ummada somalida Ogadeniya, waxa aan ku qanacsanahay xeerarka Caalamka u yaala. Mana ka tanaasuleyno waxii sharciga caalamku noo ogolyahay. waxaan nahay ummad islaam ah oo Somali ah oo ku hoos jirta Dulmi iyo Gumaysi.

7: Gabagabo:

Shacabka Soomaalida Ogaadeeniya waxa uu soo maray Halgamo aad u dheer oo waxa ay ku hoos jireen Guumeysiga madow muddo gaadhaysa 1 Qarni iyo nus. Mudadaas waxaa lagu jiray baadi

goob lagu raadinaayo aayaha ummada Soomaalida Ogaadeeniya. Jiilkastaba waxa uu usha u soo dhiibayay jiilka kale kuwaas oo halkaas kasii waday Halganka iyo Qadiyadda Shacabka Soomaalida Ogaadeeniya.

Maanta waxaa Halganka soomaalida Ogaadeeniya uu marayaa marxalado aad xasaasi u ah. Aduun Casri ah oo Adoonsigii la tir tiray Cadaaladuna ay tahay mid meel kasta looga ololeeyo, sida owgeed si loo gaaro natiijada guusha ee Xorriyada, Shacabka soomaalida Ogaadeeniya waxaa waajib saaran ah qofkasta oo muwaadin Soomaalida Ogaadeeniya ah inay ka qaybqaataan Halganka Xoriyad- doon una hiiliyaan Shacabka dhibaateysan ee Soomaalida Ogaadeeniya.

Shacabka Somalida Ogadeniya ee ku sugan Qurbaha waxa ay heystaan fursado qaali ah, waxa ay ku sugan yihiin Wadamadii dhiibay Qadiyadooda ee gacanta u galiyay Guumeysiga Madow ee Itoobiya. Taariikhdaas madow waxa ay nasiib u yeelan karaan inay tir tiraan oo waji cusub u furaan Qadiyaddi laga fooftaan habaabayay. Waa inay xoogga saaraan sidii siyaasadda ku aadan Geeska Afrika ee Wadamada ay ku nool yihiin saameyn ugu yeelan lahaayeen. Maanta waxa ay heystaan Xoog sidii dowlad u hanan kara dhulkooda kaas oo ah Ciidanka ONLF.

Ummada Soomaaliyeed waxaa waajib saaran ah inay soo celiyaan Qadiyaddii wanaagsaneed ee Soomaalinimada aheyd. Maamul Goboleedyada ka jira Somaliland iyo Puntland waa ina ay ka waantoobaan dhibaataada ay u geysanayaan Dad Shacab ah oo ka kooban Caruur iyo Hooyoyin kuwaasoo ku sooqaxay Dhulkooda, hadeysan badbadin karin waa inaysan u gacan galin cadowga ma-naxaanka ah ee Dhaqan iyo Diin toona aysan wadaagin.

Waxaa xusid mudan Dardaarankii uu noogatagay Cali Yusuf Khaliif (Cali food), All ha u naxariistee. Waa erayo dhaxal-gal ah oo mudan in si wanaagsan loo dhuuxo.

“Shacabyahoow wanaagsani kaan wahashaanaa tahay, midka cadowga wiiqee halagankaba wadaa tahayee Wallaan kudhaartee mid wadaniya baad tahayee, wacadkaynu dhiganana midkaan kaweeccan baad tahay Inta uu Wayaanuhu wadankeena joogana waligiin ha daalina, halkiina ka siiwada Soomaali wadarteed wallaaleenu nahayee waaciidsa mooyee, marnaba yaan wax loo dhimin Midkii inaga weecdee Walaf inaga qaatana, waxa inagu waajib ah in aan waaninnaa Waxaa inagu waajib ah in aan waaninnaa Waxaa inagu waajib ah in aan waa ninnaa Waxaa inagu waajib ah in aan waa ninnaa”.

Mustafe Ibrahim

Xiriir: Somaligalbeed@yahoo.co.uk

Afeef: Fikradda qoraalkan waxaa leh qoraaga ku saxiixan

ⁱ http://www.ogadenrights.org/documents/Human_Rights_Violations.pdf

ⁱⁱ http://shr.aaas.org/aaas_ogaden_12jun2008.pdf

ⁱⁱⁱ <http://www.alertnet.org/thenews/newsdesk/L28631857.htm>

<http://www.independent.co.uk/news/world/africa/ethiopias-own-darfur-as-villagers-flee-governmentbacked-violence-394904.html>